**DOWLAD-GOBOLEEDKA JUBBALAND EE SOOMAALIYA**

# Xeer-nidaamiyaha 2aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

# Rafcaannada

**Tusmo**


***1. Hordhac*** ***1***

1.1. Awoodda, Hadafka iyo Baaxadda 1

1.2. Mabaa'diida Hagaya 1

1.3. Waxa lagu maamulayo 1

1.4. Erey-bixinta 2

***2. Habraaca Rafcaanka*** ***3***

2.1. Geeddi-socod laba heer ah 3

2.2. Dib-u-eegis isla hay'adda dhexdeeda ah oo uu sameeyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda 3

2.3. Sixitaannada (*Remedies*) uu faro Guddiga 4

2.4. Dib-u-eegista uu sameeyo Guddiga Rafcaannada ee Madaxa Bannaan 4

***3. Qaabka uu u Sameysan Yahay Guddiga Rafcaannada*** ***5***

3.1. Dhisidda Guddiga Rafcaannada ee madaxa bannaan 5

3.2. Xubnaha Guddiga Rafcaannada 5

3.3. Madax-bannaanida 6

***4. Lacagsiinta Xubnaha Guddiga Rafcaannada*** ***6***

***5. Awoodda Guddiga Rafcaannada*** ***6***

***6. Rafcaannada*** ***6***

6.1. Geeddi-socodka Rafcaannada 6

6.2. Ogeysiinta Rafcaannada 7

6.3. Muddo-kordhinta Soo-gudbinta Rafcaan 7

6.4. Diididda Rafcaan 7

6.5. Ka-noqoshada Rafcaan 8

6.6. Rafcaannada waraaqaha ku qoran iyo dhegeysiyada 8

6.7. Matalaad 8

6.8. Sirnimada 8

6.9. Waajibka saaran shakhsiyaadka ka shaqeeynaya rafcaanka 8

6.10. Sixitaannada uu amro Guddiga Rafcaannad 8

6.11. Go'aanka rafcaan 9

***7. Dib-u-eegis Garsoor*** ***9***

***8. Ansaxinta Xeer-nidaamiyaha*** ***9***

# 1. Hordhac

## 1.1. Awoodda, Hadafka iyo Baaxadda

1.1.1. Xeer-nidaamiyahan waxaa la soo saarey iyada oo laga ambaqaadayo Qodobka 31aad, Faqradda 31.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

1.1.2. Xeer-nidaamiyahan waa "xeer la diidi karo" sida loogu qeexay Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 waxaana sida ay sheegayso faqradda 1.4.1(f) marayaa muddo aan ka badneyn toban (10) maalmood oo uu dib-u-eegis ku sameynayo Baarlamaanka

1.1.3. Xeer-nidaamiyahan waxaa uu sameynayaa habraacyada ay tahay in ay raacaan Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyo Hay'adda Loo Shaqeeyo marka ay soo gudbinayaan ayna maareynayaan rafcaannada ay qaataan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

## 1.2. Mabaa'diida Hagaya

1.2.1. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa hagaya mabaa'diida naxariista, daah-furnaanta, bulsho-u-adeegga iyo ixtiraamidda ku kala-dambeynta maamulka, daacadnimada, sirnimada, anshax hawleed, hufnaanta, waxtarka, xirfadlenimo, xaq ku shaqeyn, sinnaan iyo hababka ugu wanaagsan ee hawlqabadka.

1.2.2. Dhammaan shaqaalaha rayidka ah ee dowladda waa in xaqooda uu buuxa waqtigii la rabey loo siiyaa si waafaqsan xeer-nidaamiyahan.

1.2.3. Dhammaan shaqaalaha rayidka ah ee dowladda waa in ay ka go'naataa in ay waajibaadyadooda iyo mas'uuliyahooda uga soo baxaan si waafaqsan tilmaanta qoran ee shaqadooda iyo mabaa'diida, xeer-nidaamiyeyaasha, siyaasadaha iyo habraacyada lagu maamulo shaqaalaha rayidka ah ee dowladda.

1.2.4. Dhammaan shaqaalaha doorkoodu yahay maamul iyo maareyn waxaa saaran mas'uuliyad ah in ay si wax-soo-saar leh u maareeyaan shaqaalahooda, taas oo ay ka mid tahay imaanshaha shaqada.

## 1.3. Waxa lagu maamulayo

1.3.1. Marka laga reebo waxa xagga hoose lagu cayimey, xeer-nidaamiyahan waxaa lagu maamulayaa soo-gudbinta iyo maareynta rafcaannada ay qaataan dhammaan shaqaalaha maamulka iyo maareynta ee Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda ee waqti buuxa iyo kuwa waqti gaaban shaqeeya ee Dowlad-goboleedka Jubbaland oo mushaarkooda laga bixiyo Miisaaniyadda Mideysan.

1.3.2. Xeer-nidaamiyahan waxaa sidoo kale lagu maamulayaa shaqaalaha loo magacaabey jagooyin ka mid ah Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee maaliyaddoodu ay bixinayaan deeq-bixiyeyaal, sida ku xusan Qodobka 22aad ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017.

1.3.3. Xeer-nidaamiyahan laguma maamulayo:

a) Xubnaha ka tirsan ciidanka booliska, ciidamada amniga, iyo ciidamada qalabka sida
b) Xubnaha garsoorka
c) Saraakiisha la soo doorto
d) Wasiirrada, Wasiir-ku-xigeennada iyo xubnaha golayaasha ama Guddiyada uu magacaabo Madaxweynaha
e) Shaqaalaha sharikaadka ganacsi ee ay dowladdu leedahay oo u shaqeeya qaab ganacsi
f) Shaqaalaha loo qorto Qandaraasyo Muddo Go'an socda si ay u bixiyaan adeegyo xirfadeed kuwaas oo ah kuwo gaar ah oo ka madax-bannaan hay'adda Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda
g) Shaqaalaha u shaqeeya qandaraasle ay dowladdu u qaadatey in uu bixiyo adeegyo.

1.4. Erey-bixinta

1.4.1. Xeer-nidaamiyahan dhexdiisa, ereyadan waxaa ay yeelanayaan macnaha soo socda;

a) ***"Rafcaan"***waxaa loola jeedaa Rafcaan ka dhan ah go'aan sida lagu sheegey Qodobka 30aad ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017.

b) ***"Ogeysiin Rafcaan"***waxaa loola jeedaa ogeysiin la siiyey Guddiga Rafcaannada in uu bilaabo Rafcaan si waafaqsan Qodobka 30aad ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017.

c) ***"Rafcaanle"***waxaa loola jeedaa qof rafcaan ka dhan ah ka qaatey go'aan la soo saary.

d) ***"Guddiga Rafcaanka***" waxaa loola jeedaa hay'adda uu Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah u magacaabo in ay dhegeysato rafcaannada ka dhanka ah ciqaabaha anshax-marinta ah ama cabashooyinka ka dhasha go'aamo ay gaartey Hay'ad Loo Shaqeeyo

e) ***"Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed"*** waxaa loola jeedaa qof u shaqeeya Hay'ad Loo Shaqeeyo oo mushaarkiisa laga bixiyo Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya sida ay dhigeyso faqradda 4.1e) ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

f) ***"Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda"*** waxaa loola jeedaa Shaqaalaha Rayidka ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladdu waxaa ay si waafaqsan qodobbada xeerkan u qabtaan dhammaan hawlaha fulinta iyo kuwa maamul iyo adeeg-bixin ee Dowladda.

g) ***"Guddiga"*** waxaa loola jeedaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda ee lagu dhisey Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

h) ***"Madax-Waaxeed"*** waxaa loola jeedaa waax heerkeedu gaarsiisan yahay Agaasime.

i) ***"Xeer la diidi karo"***waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiye uu Baarlamaanku u haysto muddo cayiman oo uu kaga soo horjeesan karo (diidi karo) ka hor inta *Xeer-nidaamuyuhu* dhaqangal noqon.

j) ***"Hay'ad Loo Shaqeeyo"*** waxaa loola jeedaa Wasaarad, wakaalad ka tirsan Wasaarad, ama Guddi Madax-bannaan oo Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ka mid ah oo shaqaaleysta Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

k) ***Qof Shaqaale ah"*** waxaa loola jeedaa Qof Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed ah oo ay shaqaaleysatey Hay'ad Loo Shaqeeyo.

l) ***"Madaxa Hay'adda Loo Shaqeynayo"*** waxaa uu macnaheedu yahay Agaasimaha Guud (Xoghayaha Joogtada ah) ee Wasaarad ama sarkaal gacanta ku haya hawlaha fulinta ee Hay'adda Loo Shaqeynayo

m) ***"Tilmaammo/amarro"***waxaa loola jeedaa xeerar, buugaag, amarro, dhabbe-tuseyaal iyo ogeysiisyo waxaana soo saara Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda oo u maraya Guddoomiyaha Guddiga. Tilmaamaha (amarrada) waxaa ay caadi ahaan tahay in islamarkaa ama waqti cayiman lagu fuliyo.

n) ***"Maareeye"*** waxaa loola jeedaa qofka sida tooska ah uu u hoos tago Qofka ka tirsan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

o) ***"Wasaarad"*** waxaa loola jeedaa Wasaarad ka mid ah Laanta Fulinta ee la dhisey iyada oo la raacayo dastuurka Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

p) ***"Xeer-nidaamiye"***waa *xeer la diidi karo* oo bixinaya xeerar faahfaahsan oo uu diyaariyo uuna soo saaro Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si loogu hawlgeliyo waxyaabaha uu dhigayo Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017. Xeer-nidaamiyeyaashan waa kuwo ay waajib tahay in loo hoggaansamo laakiin ma aha Xeer uu soo saarey Baarlamaanka**.**

q) ***"Dhinacyada"***waxaa loola jeedaa Rafcaanlaha iyo hay'adda soo saartey go'aanka rafcaanka laga qaatey.

# 2. Habraaca Rafcaanka

2.1. Geeddi-socod laba heer ah

2.1.1. Habraaca rafcaannada waxaa uu ka koobnaanayaa laba heer. Heerka koowaad - codsi rafcaan looga qaadanayo go'aan ayaa loo gudbinayaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda oo baaraya arrinta. Haddii Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda uu ku guuleysan waayo in uu go'aanka wax uga qabto si uu ku qanco rafcaanlaha, heerka labaad ee geeddi-socodka rafcaannada waa in rafcaan loo qaato Guddiga Rafcaanka.

2.2. Dib-u-eegis isla hay'adda dhexdeeda ah oo uu sameeyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

2.2.1. Rafcaanlaha waa in uu marka hore codsi dib loogu eegayo go'aankii hore u soo gudbiyaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda;

2.2.2. Codsiyada waa in ay la socotaa waraaq faahfaahineysa sababta (sababaha) loo codsadey in dib-u-eegista la sameeyo waana in Guddiga loogu soo gudbiyaa 30 maalmood gudahooda marka la helo go'aanka hore;

2.2.3. Dib-u-eegista waa in uu sameeyaa mid ka mid ah Xubnaha Guddiga oo aan ku lug lahayn go'aankii hore. Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in uu Rafcaanka go'aan uga gaaraa 20 maalmood gudahooda haddii aaney jirin macluumaad kale oo dheeri ah oo loogu baahan yahay in go'aan la qaato markaasna Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa uu Rafcaanlaha qoraal ugu sheegayaa daahitaanka.

2.2.4. Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa uu adeegsan karaa dhammaan awoodaha lagu siiyey Qaybta 5aad, Qodobka 20aad ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 oo ay ka mid tahay in uu amro in baaritaan ballaaran lagu sameeyo hab-dhaqannada arrimaha shaqaalaha ee Hay'adda Loo Shaqeeyo.

2.3. Sixitaannada (*Remedies*) uu faro Guddiga

2.3.1. Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa uu soo saari karaa sixitaannada soo socda:

a) In rafcaanlaha lagu celiyo jagadiisii haddii jagada laga qaadey ama darajadiisa hoos loo dhigey
b) In uu joojiyo beddelaad aan la codsan;
c) In uu ka qaado shaqo ka hakin (*suspension*) la saarey;
d) In uu Hay'adda Loo Shaqeeyo faro in ay bixiso raalli-gelin;
e) In uu Hay'adda Loo Shaqeeyo ku hago dib-u-eegis ama wax-ka-beddel ay ku sameyso habraacyadeeda;
f) Sixitaan kasta oo kale oo Guddiga Rafcaannada loo oggol yahay in uu soo saaro.

2.3.2. Haddii baaritaanka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah uu muujiyo dhibaatooyin ballaaran oo dhinaca qaab-dhismeedka; dhaqanka ama habraaca ah, waxaa uu soo saari karaa talooyin lagu saxayo guul-darrooyinka hay'adeed iyo sidoo kale sixitaanno ku habboon dib-u-eegista gaarka ah;

2.4. Dib-u-eegista uu sameeyo Guddiga Rafcaannada ee Madaxa Bannaan

2.4.1. Haddii Rafcaanle uu aqbali waayo sixitaanka uu Guddigu ku soo jeediyey Qodobka 2aad, Faqradda 2.3.1 oo uu soo saaro qoraal rafcaan, markaa Guddigu waxaa uu Guddi Rafcaan oo madax-bannaan sida uu dhigayo Qodobka 3aad ee Xeer-nidaamiyaha ku dhisayaa 30 maalmood gudahooda oo ka bilaabma marka uu helo ogeysiinta rafcaanka, waxaana uu Guddiga Rafcaannada u diyaarinayaa dhammaan dokumentiyada la xiriira dib-u-eegista.

# 3. Qaabka uu u Sameysan Yahay Guddiga Rafcaannada

3.1. Dhisidda Guddiga Rafcaannada ee madaxa bannaan

3.1.1. Iyada oo laga ambaqaadayo Qodobka 30aad, Faqradda 30.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017, Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa uu dhisayaa Guddi Rafcaan oo madax-bannaan si uu u eego rafcaannada ay soo qaataan shaqaalaha rayidka ah ee dowladda.

3.1.2. Guddiga Rafcaannada ee madaxa-bannaan waxaa uu kulmayaa 10 maalmood gudahood marka la magacaabo waana in uu kiis kasta uu wax ka qabtaa isaga oo aan la daahin. Dhammaan kiisaska waa in wax lagaga qabtaa 16 toddobaad gudahooda oo ka bilaabma marka qoraalka ogeysiinta ah uu helo Guddiga Rafcaannada. Haddii aan arrinta wax lagaga qaban karin muddadaa gudaheeda markaa Guddigu waa in uu Rafcaanlaha qoraal ugu sheegaa arrintaas.

3.2. Xubnaha Guddiga Rafcaannada

3.2.1. Guddiga Rafcaannada waa in uu ka koobnaadaa shan (5) xubnood;

3.2.2. Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ayaa Guddiga Rafcaannada u dhisaya hadba sidii loogu baahdo. Iyada oo lala qabo sida ay tilmaameyso faqradda 3.2.3 haddana xubnaha Guddiga Rafcaannada waxaa lagu xulanayaa si ku dhisan khibradda iyo kartida uu qofku kaga qaybqaadan karo go’aanka kiiska gaarka ah ee markaa hor yaalla. Halkii ay suuragal tahay iyada oo la eegayo hufnaanta ayaa Guddiga Rafcaannada waxaa uu hal fadhi wax kaga qabanayaa tiro kiisas ah si looga fogaado in kiis kasta loo dhiso Guddi Rafcaan.

3.2.3. Guddiga Rafcaannada waxaa uu ka koobnaanayaa xubnahan soo socda:

i. Xubin waa in ay ka socotaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waana in xubintaasi ahaataa xubinta Guddiga ee aan ku lug lahayn go’aankii hore ama dib-u-eegista gudaha Guddiga;

ii. Wakiil sare oo ka socda Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha (*ku yimaadda mansabka uu hayo)* ama Wasaaradda Xafiiska Madaxweynaha (Madaxtooyada);

iii. Qof matalaya ururka (ururrada) shaqaalaha;

iv. Qof khibrad u leh iyo ama aqoon rasmi ah u leh maamulka dowladeed; maamulka hay’adaha/ganacsiga gaarka loo leeyahay, sharciga, ururrada shaqaalaha, arrimaha shaqaalaha;

v. Odey waayo-arag u ah dhexdhexaadinta dhaqanka ama Sharciga Islaamka.

3.2.4. Xubinta Guddiga ku mataleysa Guddiga Rafcaannada ayaa guddoomineysa. Doorka guddoomiyuhu waa in uu hubiyo in nidaamka sharciga ah loo maro arrinta iyo in qoraal xusuus ah laga reebo doodaha iyo go’aamada Guddiga Rafcaannada.

3.2.5. Xoghaynta Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ayaa taageero dhinaca maamulka ah haddii uu u baahdo siineysa Guddiga Rafcaannada.

3.2.6. Habraacyada ay ku nidaaminayaan hawlaha gudaha ee Guddiga Rafcaannada waxaa soo saaraya Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

3.3. Madax-bannaanida

3.3.1. Guddiga Rafcaannada waxaa uu si madax-bannaan u gudanayaa mas'uuliyadihiisa waxaana looga baahan yahay in uu ahaado mid ku shaqeeya dhexdhexaadnimo iyo eex-la'aan marka uu go'aamo ka gaarayo rafcaanno;

3.3.2. Marka laga soo tago xubnaha ku yimaada mansab kale oo ay hayaan (*ex officio members*) iyo xubnaha guddiga shaqaalaha rayidka ah ee dowladda, waa in Xubnaha Guddiga Rafcaannada uusan midkoodna jago ka haynin xafiis dowladeed ama xisbi siyaasadeed muddada ay shaqeynayaan.

# 4. Lacagsiinta Xubnaha Guddiga Rafcaannada

4.1. Ka-qaybqaadashada uu Shaqaale Rayid ah ee Dowladeed uu ka-qayb-qaato hwlaha Guddiga Rafcaannada waxaa loo tixgelinayaa in ay qayb ka tahay waajibaadyada caadiga ah ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda sidaa daraaddeedna ma jiraan mushaar, ujuuro ama gunno dheeri ah oo u waajibeya.

4.2. Xubnaha aan ahayn Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee Guddiga Rafcaannada waxaa la siin karaa gunno fadhi ee uu u dejiyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowlada uuna soo saaro iyada oo ah Tilmaan (amar) gooni u taagan. Bixinta gunnada fadhiga waxaa mas'uuliyaddeeda leh Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in lagu daraa geeddi-socodka miisaaniyad-sanadeedda.

# 5. Awoodda Guddiga Rafcaannada

5.1. Guddiga Rafcaanka waxaa uu:

a) Tallaabo qaadi karaa iyada oo uu maqan yahay rafcaanlaha haddii cidda la gaarsiiyo ogeysiis muddo ku filan ka hor;

b) Macluumaad dheeri ah ka codsan karaa dhinacyada;

c) U yeeri karaa markhaati.

# 6. Rafcaannada

6.1. Geeddi-socodka Rafcaannada

6.1.1. Qof shaqaale ah oo ay dhibaato ka soo gaartey go'aan ay soo saartey Hay'ad Loo Shaqeeyo ayaa ka qaadan kara rafcaan si waafaqsan Qodobka 30aad ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017.

6.1.2. Waxaa rafcaan laga qaadan karaa go'aamadan soo socda:

a) go'aan la xiriira kala-sooca (*classification*);

b) go’aan la xiriira xeer-nidaamiye anshax-marineed;

c) go’aan la xiriira shaqo-qoris, dallacsiin iyo/ama beddelaad;

d) go’aan la xiriira sida uu qofku shaqada uga soo baxay;

e) go’aan la xiriira mushaaraadka iyo gunnooyinka/faa’iidooyinka kale;

f) go’aan la xiriira fasaxyada;

g) go’aan xaddidaya xuquuqaha qof shaqaale ah;

h) go’aanku saabsan waxkasta oo kale oo uu qofka shaqaalaha ah uu Xeer kale u oggolaanayo in uu rafcaan ka qaato.

6.1.3. Qof arji shaqo u soo qortey ama qof ka tirsan shaqaalaha rayidka ah ee dowladda oo arji u soo qortey jago ka tirsan shaqaalaha rayidka ah ee dowladda oo aan ku qancin geeddi-socodka ama natiijada geeddi-socodka shaqo-qorista.

6.2. Ogeysiinta Rafcaannada

6.2.1. Rafcaanka waa in uu ahaadaa qoraal waana in loo soo gudbiyaa Guddiga Rafcaannada isagaoo ku qoran Foomka Ogeysiinta Rafcaannada.

6.2.2. Caddeyn taageereysa oo daliil u ah waxa uu rafcaanku ku saleysan yahay waa in lala soo gudbiyaa Foomka Ogeysiinta Rafcaanka.

6.2.3. Rafcaan ayaa bilowdey marka Ogeysiin Rafcaan loo soo gudbiyo Guddiga Rafcaannada oo Guddiga Rafcaannaduna uusan u helin daliil uu ku diido rafcaanka. Marka laga codsado, Guddiga Rafcaannada waxaa uu kordhin karaa waqtiga lagu bixinayo ogeysiin rafcaan haddii daliil caqligal ah loo hayo [Qodobka 8aad].

6.2.4. Guddiga Rafcaannada waa in uu:

a) Helitaanka qoraalka ogeysiinta rafcaanka ugu qiraa rafcaanlaha muddo 30 maalmood gudahood ah;

b) Nuqulka qoraalka ogeysiinta rafcaanka siiyaa dhinaca kale ee rafcaanku khuseeyo.

6.3. Muddo-kordhinta Soo-gudbinta Rafcaan

6.3.1. Marka ay jiraan xaalado gaar ah, ayaa dhinac ka mid ah dhinacyada waxaa uu Guddiga Rafcaannada ka codsan karaa in uu u kordhiyo waqtiga lagu soo gudbin karo rafcaan ama ay waajib tahay in lagu soo gudbiyo dokumentiyo kale oo la xiriira rafcaanka.

6.4. Diididda Rafcaan

6.4.1. Guddiga Rafcaannada waxaa uu leeyahay awood uu ku diidi karo rafcaan haddii:

a) Rafcaanku uu ka baxsan yahay arrimaha hoos yimaada xukunkiisa;

b) Racaanka la soo gudbiyo ka dib waqtigii loogu talogaley;

c) Rafcaanka ay wax ka dhimman yihiin oo codsigii Guddiga Rafcaannada uu ku codsanayey macluumaadna aan loo hoggaansamin;

d) Rafcaanku uusan waafaqsaneyn xeerarka habraaca u habboon ee loogu dejiyey xeer-nidaamiye;

6.4.2. Dhammaan go'aamada lagu diidayorafcaan waa in qoraal sababeysan lagu gaarsiiyaa dhinacyada.

6.5. Ka-noqoshada Rafcaan

6.5.1. Rafcaanlaha waxaa uu ka noqon karaa rafcaanka ka hor inta Guddiga Rafcaannada uusan go'aan ka gaarin rafcaanka.

6.6. Rafcaannada waraaqaha ku qoran iyo dhegeysiyada

6.6.1. Guddiga Rafcaannada ayaa rafcaan go'aan uga qaadan kara keliya qoraallada loo soo gudbiyo.

6.6.2. Halkii ay lagamamaarmaan tahay Guddiga Rafcaannada waxaa uu sameyn karaa dhegeysiyo waxaana uu dhinacyada ka codsan karaa in ay bixiyaan caddeyn afka ah.

6.7. Matalaad

6.7.1. Rafcaanlaha waxaa marxalad kasta oo ka mid ah rafcaanka matali kara:

a) wakiil sharci-yaqaan ah,

b) wakiil ka socda urur shaqaale,

c) ama qof kasta oo kale oo uu door-bido.

6.8. Sirnimada

6.8.1. Dhinacyadu waa in aaney shaaca ka qaadin macluumaad sir ah inta laga warsugayo rafcaanka.

6.9. Waajibka saaran shakhsiyaadka ka shaqeeynaya rafcaanka

6.9.1. Guddiga Rafcaanka ee dhegeysanaya oo go'aaminaya rafcaannada;

a) Waa in ay hawlahooda u qabtaan si ku saleysan madax-bannaani, dhex-dhexaadnimo, caddaalad, iyo sida ay danta guud ku jirto;

b) Marka ay hawlahooda ku guda jiraan, ma ahan in ay amar ka qaataan guddiga shaqaalaha rayidka ah ee dowladda, sarkaal dowladeed ama siyaasi.

6.10. Sixitaannada uu amro Guddiga Rafcaannad

6.10.1. Haddii Guddiga Rafcaannada uu taageero rafcaanka, waxaa uu cabashada/cabashooyinka ku sixi karaa isaga oo soo saara sixitaannadan soo socda:

a) In rafcaanlaha lagu celiyo jagadiisii haddii jagada laga qaadey ama darajadiisa hoos loo dhigey

b) In uu joojiyo beddelaad aan la codsan;

c) In uu ka qaado shaqo ka hakin (*suspension*) la saarey;
d) In uu Hay'adda Loo Shaqeeyo faro in ay bixiso raalli-gelin;
e) In uu Hay'adda Loo Shaqeeyo ku hago dib-u-eegis ama wax-ka-beddel ay ku sameyso habraacyadeeda;
f) Sixitaan kasta oo kale oo Guddiga Rafcaannada loo oggol yahay in uu soo saaro.

6.11. <u>Go'aanka rafcaan</u>

6.11.1. Guddiga Rafcaannada waxaa uu go'aanka rafcaanka ku siinayaa dhinacyada muddo macquul ah marka uu soo gaaro rafcaanka.

6.11.2. Go'aan rafcaan waxaa uu Guddiga Rafcaannada ku qaadanayaa marka uu helo ansaxinta aqlabiyad hal dheeri ah.

6.11.3. Marka uu go'aaminayo rafcaan, Guddiga Rafcaannada waxaa uu:

a) Xaqiijin karaa ama dhinac u dhigi karaa go'aanka rafcaanka laga qaatey;

b) U xukimi karaa sixitaanno

6.11.4. Go'aanka Guddiga Rafcaannada waa kama-dambeyn waana mid ay waajib tahay in ay raacaan dhammaan dhinacyada. Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ayaa Rafcaanlaha qoraal ku ogeysiinaya go'aanka Guddiga Rafcaannada. Marba haddii Guddiga uu ka fekero/tixgeliyo cabashada oo uuna diro jawaab markaa go'aanku waa kama-dambeys. Xiriirro kale oo dheeri ah waa la oggolaan karaa laakiin, haddii ay ka hadlayaan arrrimo kale oo cusub oo uu Guddiga Rafcaanka u arko in ay mug leeyihiin ma ahee, mar jireyso jawaab laga bixinayo.

## 7. <u>Dib-u-eegis Garsoor</u>

7.1. Xeer-nidaamiyeyaashan waxaa la soo saarey iyada oo aan rafcaanlaha laga hor istaageynin xaqa uu rafcaanluhu u leeyahay dib-u-eegis garsoorku ku sameeyo arrinta.

## 8. <u>Ansaxinta Xeer-nidaamiyaha</u>

8.1 Anniga oo adeegsanaya awoodaha ka Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland la iigu siiyey Madaxa V, Qodobka 19aad, Faqradda 19.1 ee Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 iyo Madaxa VIII, Qaybta 33aad, Faqradda 33.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017, waxaan soo saarey Xeer-nidaamiyahan oo dhaqangelaya taariikhdan soo socota.

Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda
Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya